Magaca…………………………………………..

Dugsiga………………………………………….

R/Lamber……………………………….

Wadar Dara

JAMHUURIYADDA SOMALILAND .

GUDDIGA IMTIXAANAADKA QARANKA.

IMTIXAANKA FASALKA AFRAAD.

JUNE 2008

IMTIXAANKA AF SOOMAALIGA

Waqtiga 2 Saacadood.

10 daqiiqo oo Dheeraad ah ku akhri dhammaan waraaqaha si aad u hubiso.

Amar siinta tartameyaasha.

Imtixaankani waxa uu ka kooban yahay 13 bog oo daabacan. U sheeg ilaaliyaha haddii wax kaa maqan yihiin.

- Qaybta 1aad:- (20 dhibcood)
- Qaybta 2aad:- Naxwe (10 dhibcood)
- Qaybta 3aad:- Maansada (40 dhibcood)

- Qaybta 4aad:- Maahmaaho iyo Af maldahan (15 dhibcood)
- Qayta 5aad:- Curiska (15 dhibcood)

U ISTICMAAL BAYJKAN RAF AHAAN LAMANA SIXI DOONO.

……………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

© SLNECB, 2008

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

CURAD BAAQDAY DHE

Wakhtigii uu madaxiisu i qabtey, waxa inshaaro af garasho ah u ridey ayeydii Balax oo umuliso dhaqmeed ku soo ilko ridatey. Aabbihii oo aynigiisu ugu fil roonaa jannadii Eebbe ha ka waraabiyee. Isaga oo muur xumo iyo lacag la'aan igala xishoodey in uu i sii tukubiyo ilaa dhatarka, ayaa uu hoos iila hashashaqey. Ogobey gaadhiga farooleba waa uu ku geyn kartaa dhatarka e? Allow kuu naxariiso run –ladii buu jiraaye. Waxa ii cadaatey in uu u jeedo gaadhi-ximaar aannu jaar ahayn oo heedadow ah. Waa aan u xil qariyey inta aan muusoodey oo dhoolaha cadeeyey, ayaa aan ku tiraabey : "Naa furaash iyo barkimo culus oo itiirisa ii saara gaadhi ximaarka Bacaluul. Muxuu gaadhi iga soo gaadhi karaaba haddii. Alle yidhaahdo waa uu i geyne. Markii danbe waxa na soo celiyey oo si xarrago leh noo soo anbabixiyey umulisooyinkiina u cantoobiyey, nin aannu jaar ahaan jirey muddo dheer. Aabbihii ilkaha ayaa ay waxa ku kala goosan jireen. Allah gobannimo badnaayee. Tusmo Hayaan oo ooridiisa ahayd ayaa aannu isku ag bashiishaney. Umulisooyinkii oo habeenkaa shaqo aawani u socotey, ayaa si taxadir leh iyo talantaali sariiro u yaalay madaxa boobey, wiilashii aannu habeenkaa dihaney. Waxa aannu qoys-ahaan aheyn danyar nasiibka waraabaha leh. Waxaa la yidhi : "War meel dheer dhagaxna meel dhaw ayaa uu ku dhacaaye"

Guuleed Mire ayaa qaalin cidi ku dhufaan ah ugu hogeeyey. Markii socoto tub ku joog ahayd balafi kaga soo duushey; in wiil cad oo xaraar muteystey ay umushey . Sange kala miirmay, waa siigo-cir eh, ayuu laba waaxood oo geedeysan soo fan-saarey.

Allow cuudka iyo caqligaba kuu daa! Waar umusha u yaryareeya oo dib isugu celiga iyo rugtii ayaa aan ku war helay. Odaygii reerku jawaabta uu u celiyey baa aheyd "waar guuleed ma haatuf baa wax idin soo gadhsiiyey gabadhu shaley umushee iyo mayee cirsan ka yeedh dheh!

© SLNECB, 2008

Maalintii uu ka qalin jabiyey dugsiga hoose ayaa aabbihii xijaabtey.
Ciil iyo cararaaf adduun ayaa aan ku soo taabbo geliyey. Guur iyo gayaan dumaaleedba waa aan uga hadhey; isaga iyo ubbadka igu saddexan. Alleh hortiise maalin ma ay sarseermin. Nusasaacaha ubbadka qayrtkii ah ma baryin. Iyaga naftoodu ubbad akhlaaq u dhashay ayaa ay ahaayeen, oo Eabbe igu galadey. Jaar guri iyo jiiraan dugsi toona kama soo dacwoon weligood. Inta aan bariiskooda ku maqanahay hooyo iyo aabbo ayaa dadka Alle uga dhigey.

Magacii ba' habeenkii aan ka sugaayey in uu i nasiyo, oo hantida yaree aan silic ku dhaqey bakhaarka noogu shaqeeyo. Ayaa uu dhoof ku bilkeedshay naftiisa. Labada baasaboor oo uu malmaluuqdey waa lagu qabtey, xadhig iyo mastaafuris ayaa ay meheradiisii noqotey. Habeenkan caawa ah, waxa igu maqaalo ah in uu Bariga Afrika ka huleeley.
Waxa madaxa furasho loogu heystaa Saxarah Africa.

Kuwii yeydu cuntay waalidkood waa uu ka samray. Jidka Sawd Afrika kuwii Libaaxyadu ku cuneena la quraan oo hooyooinkood samir iyo iimaan bay ka qaadeen. Qudh aan bixin sidee looga samraa. Bal saddexdii qol ee aabbahood uga dhintey aan u xaraasho. Dugsi sare ayaa uu ka qalin jibiyey; diyaar ayaa aan ula ahaa jaamicadda uu ka doorto kuuwan dalkiisa ee qayrkii ka soo wado qalin jibiyey.

Inta aan dhexda xidho oo dharaartii rooro, ayaa aan dhabarka u ridan jirey. Dheg ka maqal mooyee haween uma dhiidhiibsan sheeko ay igu dhego barjeeyaan. Taydaba ma dhaafsaneyn ee hadday i soo dhugtaan waa aan u dhoollo caddeyn jirey uun. Waayo naag kasta waxa u soo adeegaaya abbaanwaraheeda.
Anigu kalidaa jir agooni xeynka heystaan baan ahaye; maxaa iiga shan iyo taban ah, sheeko dumar. Waxaa iga xumaaday wiilkii oo Alle tahriib ku salidey. Waheey maxaa iga gaadhey! Waxa ay hadal waddaba, waxa ay qudbad sireedeedii ku soo gebgebeysay, Alle magane currad baaqday dhe!

Ka dib marka aad akhrido baaraan deggan **Curad Baaqday** goobo geli jawaabta ugu saxsan.

Qaybta 1 aad = 20 dhibcood

1. Balax waxa ay ayeeyo u ahayd.
   - b) Odeyga reerka
   - t) Uur- jiifka
   - j) Odeyga guuleed
   - x) Istaanta foolaneysey.

© SLNECB, 2008

2. Dhaqaale ahaan qoysku dhulka ayaa uu yaalaa

   b) Laakiin akhlaaq iyo dadnimo ayaa ay lahaayeen.
   t) Laakiin akhlaaqad iyo dadnimo ma aay lahayn.
   j) Laakiin edeb iyo dadnimo meesha ma oolin
   k) Laakiin odeyga ayaa macangog ahaa

3. Duqdu waxa ay inshaarda u ridey

   b) Ilmaha dhalanaaya si uu u sugo dhakhtarka
   t) Islaamaha hareero joogey
   j) Inankeedu si uu u fahmo foosha
   j) Si dadka oo dhami u ogaado arinta meesha taala

4. Gaadhiga faroole waxa uu ahaa.

   b) Mid cusub oo laga dhawraayey umusha
   t) Mid hadda faraha lagu hayey oon joogin
   j) Mid weyn oon ku haooneyn qaadista
   x). Humaag yool habaabin ah oo ay isla fahmeen qoysku.

5. Gabadha fooshu qabatey markii odeygeedu hoos wax ugu sheegey

   b) Waa ay qarstay qorshaheedii
   t) Waa ay qamandhacyootey cadho awgeed
   j) Qosol hoose oo aan baq lahayn ayaa ay muujisey.
   x) Qaradoof hoose iyo qarow ayaa ya muujisey.

6. Qoysku xaaladoodii dhaqaale ee ay dhkhatrarka ku tageen.

   b) Uun baa ay la soo noqdeen
   t) Tu ka duwan ayaa ay kala soo noqdeen
   j) Oon biyo ismarisn ayaa ay kala yimaadeen
   x) Tu ka qalafsan ayaa ay kala soo noqdeen.

7. Guuleed waxa uu ku dedo tirey umushii

   b). Awr rareeyo oo xiniin qaba
   t). Awr dayar oo dhufaan ah
   j). Awr dhexdhexaad ah oo labeeb ah

© SLNECB, 2008

x). Awr qoodh ah

8. Faraska hilbaha keeney waxa uu aha.

b). Mid ku jirey xilligii ay farduhu ugu tamar iyo taag badnaayeen
t). Xilligii ay farduhu tiigta iyo dooraha gabiyeen
j). Xilligii ay tababarka fuulimoodka ku jireen.
x) Xilligii ay dekaan-sanaayeen.

9. Wiilkan tahriibey waxa uu la kulmay.

b). Laba mashaqo oo maal ku baxay
t). Saddex mashoqo oo uu maal iyo nafiba cidhiidhi ku gashey
j). Afar mashaqo oo uu mastaafur ku galey
x). Seddex mashaqo oo uu mid ku jiro.

10. Wiilka hooyadii laba hal ayaa isu qaban waayay.

b). Akhlaaqdii uu lahaa iyo arinkuu ku kacay
t). Aqoontii uu lahaa iyo ariknan uu ku kacay.
j). Ablaamarinadii uu laha iyo arinkan uu ku kacay.
x). Aqaligii uu lahaa iyo arinkan uu ku kacay.

QAYBTA 2AAD.

NAXWE (10dhibcood).

Isladoono erayda isku macnaha ah adigoo ku jawaab bixinaya tusa hoosku xusan.

1. Waaqla — b) Gurmad
2. Jaantaarogan — t) Xisti
3. Dhalan dhool — j) Socod dheer
4. Qaylo dhaan — x) Cidla
5. Hagrasho — kh) Socod xilli kulul.

Lambar kasta hoos dhig xaqafka jawaabtiisa sida

1	2	3	4	5

© SLNECB, 2008

1. Akhri oo fahan saddexdan weedhood ee hoos ku qoran ka dibna ka jawaab waydiimaha ka dambeeya.

    - Cali waa uu yimid.
    - Qorraxdu waa ay dhacaysaa.
    - Geelu waa uu foofaa.

2. Ka soo saar saddexda weedhood.

    - Falalka ku jira? …………………………………………………………………….
    - Magac u yaalada ku jira?……………………………………………………………………..
    - Yeelayaasha ku jira?……………………………………………………………………………

   t) Qor weedh kasta goorraynteeda (aminta) falkeeda).

- Weedh 1aad
- Weedha 2aad
- Weedha 3aad

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

3. Isugu soo ururi weedh keli ah
   - Caasha waxa ay tagtay suuqa
   - Iyadu waxa ay soo iibsatay khudrad.
   - Caasha waa ay ka timid suuqa.

………………………………………………………………………………………………

t) Waxaa aan ka qayb galay aroos
Aniga iyo idiris waxa aan ku kulanay aroos.

………………………………………………………………………………………………

j) Faarax waxa uu iibsaday gaadhi cusub.
- Isagu waxa uu kexeeyay gaadhigiisii cusba.

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

© SLNECB, 2008

4. U samee astaamaha ka maqan weedhan hoos ku qoran.

- Waar ii gargaaraay
- Barihii ayaa yimid fadhiistay hadalay oo aamusay
- Qalin cusub casoo gaaban buug madow yar oo duug ah iyo xaashi jeexjeexan cad oo xun ayuu haystaa.
- Dawaladu waxa ay muujisay karti abaartii xumayd ee dhabar jabaka ahayd.

……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………

Qaybta 3aad:- MAANSADA (40 dhibcood)

Fadlan si degen uga fiirso weydiimaha lagu su'aalo hadbana uga jawaab sida waxa laguu su'aalo.

- Sanqaroor madoobow hadduu siifad yeesho baan .
- Sakaalleda iyo jeeniga hadduu dhibi ku seylaasho.
- Salaqleynta orodkii hadduu socod libaax yeesho.
- Suudiga dhaaraartii hadday saadka cumi waydo.

© SLNECB, 2008

1. Falanqee afartan tuduc ee gabeyga ah adiga oo heybo soocaaya sifo kasta oo ku jirta?

....

....

....

....

....

....

2. Ninba wxuu dadweynaha gashaday gumaradeed tuugye.

- Nafiba geedka ay beeratey goosan midhaheede
  Adiga oo maanka ku haya gabeygan ood ku dhigatey fasalka 4aad sharax waafiya ka bixisaa cidhib reebka iyo cawaaqib ka uu gabayaagu sheegaayo.

....

....

....

....

....

3.b) Sida geed caleenloo ubax guudka qariyeen oo gooni laamaha ay midibageesteed. Hoobaan Isgaadhiyo guntin midho ah leedahay oo soo gandoodoo galka faraqa soo dareyn oon gu iyo jiillaal midab guurin baad tahee!

4. t) Sidaad tahay gammaan faras sange geesi daaqsadey oo uu (garoor) galduur mirey sodon bil iyo gawdeed oo goobey farawgii sararta iyo gooddada.

Qumaati isku barbar dhig sinaanta ka dhexeyba geedka iyo farask, adiga qodob qodob uga baaraan degaaya.

....

....

© SLNECB, 2008

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

Sharax Tixanhan.

5. Akhri tixdan oo dhuux dulcadooda macne ka dibna ka jawaab suaalah ka dambeey.

1. Dam habeen madow iyo dayuxu waa is daba jooge diraac good abaara iyo roob waa is daba jooge durdur laga cabbaayo iyo oon waa isdaba jooge diihaalka gaayjo iyo dhereg waa is daba jooge dagaal lagu idladiyo heshiis waa is daba jooge waa door ba door duniduyoo waa is daba jooge.

b) Ka soo saar tixdan waxyabaha la baasaysto (lasharayso) eek u jira tixda una tax sida ay iskugu xigaan (u kala horeeyaa)?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

t) Ka soo saar markana waxayaabo ku lid ah inta wax ee dadku sharaysto ee aad qortay (kuwani waa kuwo lagu farxo) oo isugu adddi sida ay hidahaan isu leeyihiin?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………………

j) K abixi sharrax faah faahsan dulcda macne ee tixda oo caddee sida ay waxayaabaha isku lidka ah saamayn ugu leeyihiin nolosha dadka?

© SLNECB, 2008

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

QAYBTA 4aad:- MAAHMAAHAHA iyo AF MALDDAHANAYASHA (15dhibcood).

b) Milil dushii lama dhayo
t) Dan iyo madaxaa toona lagama boodo.

1. Midee dulucda labadan maahmaahood. Adigoo isku soo dhiraandhirinaaya u jeeddada guud ee ka dhexeysa?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

b) Dheri waa naaran yahay

t) Awrka rareeyo waa naaranyahay?
J) Guurtina waa naaran tahay
2. Hal weedha ku soo koob saddexda weedhood ee sar ku xusa.

……………………………………………………………………………………………

x) Dheriga kariyaha ayaa ka naar qaata

Kh) Awrka ninka hogaanka haya ayaa ka naar qaata

d) Guurtida garlaawah xaq darrooda wax ku duusiyey ayaa ka naar qaata.

3. Hal weedh ku soo ururi adigoo oon lumin macnaha seddexda weedhood ee kor ku xusan

………………………………………………………………………………………

© SLNECB, 2008

Malee adigoo maskaxdaada la kaashanaya seddexda ku naalooda? Fiiro gaar ah ka tilmaan qaado maahmaahda sare. (2 iyo 3)

b) ……………………………………………………………………………………………

t) ……………………………………………………………………………………………

j)……………………………………………………………………………………………

AF MALDDAHANAYASHA

Waxa aad maskaxdaada ka keentaa hal ama laba tuduc oo ay ku jiraan af maldahanayaasha soo socdaa (gabayo).

1) Qofeyn?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

2) Buunbuunin?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

3) Yamxeero (yamxeerin).

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

4) Shareere?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

5) Ekeeye?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

6) Duurxul?

……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………

© SLNECB, 2008

QAYBTA 5AAD 15 DHIBCOOD.
Waxa aad ka qortaa curis aan ka yareyn 250 eray labadan qodob ee hoos ku xusan mid ka mid ah haddii aad raaci waydo amarka waxa aad waayeysaa dhibcaha curiska astaamaynta, nudaha qoralka aftahmmimada, isku xidhnaanta af kaarta iyo bayaaminta qoraalkaaga waxa aad ku helaysa ama ku waayaysa dhibco.

a) Ugaadha ka sii yaraanaysa dhuleena.
b) Soo saarisdda dhuxul dhagaxd.

© SLNECB, 2008

………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………
………………………………………………………………………………………………

© SLNECB, 2008

DHAMAAD

© SLNECB, 2008